



Lacagta Damaanadda Dugsiga ee 2020 ee La Soo Jeediye



Guddiga Waxbarashada ee Dugsiyada Guud ee Portland waxa uu u gudbiyey Lacagta Damaanadda ee Dugsiga ee 2020 ee la soo jeediye cod bixiyeaasha, Xeerka 26-215. Haddii ay cod bixiyeaashu ansixiyaan 3 da Noofembar, Lacagta Damaanadda ee Dugsiga ee 2020 ee la soo jeediye waxa lagu maal gelin doonaa mashaariicda badbaadada iyo caafimaadka ee dugsiyada ku baahsan degmada dugsiga, waxa lagu beddeli doonaa buugaagta daabacan iyo agabka tiknoolajidda ee degmada oo dhan, waxa lagu casriyeyn doonaa Dugsiga Sare ee Jefferson, waxa lagu maamuli doonaa qorshaha mashaariicda dugsiyada jaarka ee dheeraadka ah, waxa lagu dhamaystiri doonaa Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson, waxana lagu sii wadi doonaa naqshadaynta iyo qorshaynta casriyeynta Dugsiyada Sare ee Cleveland iyo Wilson.

Haddii ay cod bixiyeaashu ansixiyaan, maxaa ay qaban doontaa lacagta damaanadda ah ee la soo jeediye?

Mashaariicda Waxbarashada & Awoodda Helitaanka:

- Waxa ay ku beddeli doontaa buugaagta daabacan iyo agabka manhajka agab manhaj oo cusub dhammaan aagagga maaddada;
- Waxa ay ka beddeli doontaa ama ay siin doontaa ardayda taabletyo iyo laabtobyoo si ay u bixiyaan helitaanka tiknoolajiyadda si ay u taageeraan fasalka iyo waxbarashada masaafadda ah, waxana ay cusboonaysiin doonaan tiknoolajiyadda fasalka iyo degmada; oo
- Waxa ay cusboonaysiin doonaan goobaha waxbarashada gaarka ah iyo agabka tiknoolajiyadda

Mashaariicda Caafimaadka, Badbaadada & Awoodda Helitaanka:

- Waxa ay dhaqan gelin doontaa marxaladda ugu horaysa ee Qorshaha Kala Guurka ADA ee PPS' ee dugsiyada degmada oo dhan;
- Waxa ay dayac tiri doontaa ama beddeli doontaa saqafyada dugsiga ee liigaya ama dhaawacan;
- Casriyeynta dhulgariirka loogu talagalay ee illaa saddex dugsi;
- Waxa ay dayac tiri doontaa ama ay beddeli doontaa nidaamyada farsamada (kulaylinta, qaboojinta iyo soogelinta hawada); oo
- Waxa ay cusboonaysiin doontaa qufullada albaabada fasallada, waxa ay rakibi doontaa nidaamyada kamarooyinka ammaanka, waxana ay casriyeyn doontaa ama beddeli doontaa nidaamyada digniinta soo gelitaanka si loo xoojiyo ammaanka.

Casriyeynta & Dib-udhiska Dugsiga:

- Waxa ay casriyeyn doontaa Dugsiga Sare ee Jefferson, ee markii ugu horaysay la dhisay 1909; waxa ay maamuli doontaa qorshaha iyo naqshadda dugsiyada iyo xarumaha Waqooyiga iyo Waqooyi-bari ee Portland; waxana ay maalgelin doontaa mashaariicda bilawga ah ee koox ka mid ah dugsiyada iyo xarumaha dugsiyada jaarka;
- Waxa ay dhamaystiri doontaa naqshadda dhismaha kahor ee mashaariicda casriyeynta Dugsiyada Sare ee Cleveland

Mashaariicda Lacagaha Damaanadda Dugsiga ee 2020 ee La Soo Jeediye

Horumarinta Waxbarashada & Awoodda Helitaanka	\$228.8M
Manhajka	53.4M
Tiknoolajiyadda	128.2M
Maalgelinta Waxbarashada Gaarka ah	13.4M
Awoodda Helitaanka ADA	33.8M
Mashaariicda Caafimaadka & Badbaadada	\$183.8M
Saqafyada	65.7M
Farsamada	75.0M
Ammaanka	25.9M
Talagalka Dhulgariirka	17.2M
Casriyeynta & Dib-udhiska	\$639.0M
Dugsiga Sare ee Jefferson: Casriyeynta	311.0M
Xarunta sarreynta Ardayga Madow: Qorshaynta, Naqshadda, Dhisitaan	60.0M
Marxalado leh	
Dugsiyada Sare ee Cleveland/Wilson: Qorshaynta, Naqshadda, Dhisitaanka Kahor	40.0M
Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson: Dhamaystirka	152.0M
Waddooyin Badan oo Loo Maro Qallinjebinta: Dhismaha Xarunta	64.0M
Qaadka/Is-qoritaanka/Naqshadda	12.0M
Maamulka (6%):	63.0M
Kadiska Barnaamijka oo aanay ku jirin Manhajka iyo Tiknoolajiyaddu (10%):	93.3M
Wadarta	\$1.208B

iyo Wilson; waxa ay ballaadhin doontaa dugsiga sare ee Roosevelt; waxa ay qorshayn/ku dari doontaa qaad dheeraad ah, qiyaastii dugsiyada dhexe; oo

- Waxa ay dhamaystiri doontaa Dugsiga Sare ee Farsamada ee Benson waxana ay ka dhisi doontaa dhismaha barnaamijyada dugsiga oo beddel ah xarunta Benson



Lacagta Damaanadda Dugsiga ee 2020 ee La Soo Jeediyey



Xidmada lacagta damaanadda ah ee la soo jeediyey waxa lagu soo wargeliyey jawaab ka timid qoysaska, ardayda, shaqaalaha, xubnaha bulshada iyo qiimaynta xarumaha farsamada ee PPS.

Haddii curaarta la soo jeediyey aan la ansixin, mashaariicda sare lagu sheegay la dhammaystiri maayo.

Haddii ay cod bixiyeaashu ansixiyaan, maxay noqon doontaa qiimaha lacagta damaanadda ah ee la soo jeediyey?

Curaaraha 2012 iyo 2017 waxay ahaayeen canshuurta cusub ee hantida oo ay ansixiyeen codbixiyaashu, oo marka la isku daro ah \$2.50 calaa \$1,000 ee qiimaha la soosaaray. Maadaama sicirka canshuurta curaartii hore ay hoos u dhacayaan – sababtoo ah adeegga daynta oo sii yaranaya – haddii codbixiyaashu ansixiyaan \$1.208 bilyan ee lacagta raasamaalka ee curaaraha qaanta guud, sicirku wuxuu qiyaastii noqon \$2.50 calaa \$1,000 ee qiimaha la soosaaray. Haddii loo codayn waayo, sicirku wuxuu hoos ugu dhici qiyaastii \$1.50 calaa \$1,000 ee qiimaha la soosaaray marka la gaaro 2022 iyo \$1.00 calaa \$1,000 qiimaha la soosaaray marka la gaaro 2026.

Isla-xisaabtanka iyo hufnaanta

Sidii uu xaalku ahaa lacagaha damaanadda dugsiyada ee hagaajinta raasamaalka 2012 kii iyo 2017 kii, haddii xeerka la ansixiyo, Guddiga Isla-xisaabtanka Lacagta Damaanadda ee PPS –koox madax bannaan oo xubno bulsho oo la magacaabay ah–waxa ay dib u eegi doonaan warbixinada iyo baadhitaanada dhaqaale ee sanadkiiba afar jeer soo baxa ee sida doolarada lacagaha damaanadda ah loo kharash gareeyo, si loo siiyo isla xisaabtan bulshada illaa dhismuhu uu dhamaanayo.

Lacagihii Damaanadda Dhismaha ee Raasamaalka PPS ee Hore

2012 kii iyo 2017 kii, cod bixiyeaashu waxa ay ansixiyeen lacagaha damaanadda raasamaalka lagu maalgaliyey horumarinta lagu samaynayo dhismayaasha Dugsiyada Dadweynaha ee Portland, kuwaas oo badankooga la dhisay 80 illaa 90 sano kahor.

Labadii lacagood ee damaanadda ahaa ee hore waxa lagu maalgaliyey mashaariicda casriyeynta iyo dib-udhiska kuwaas oo la dhamaystiray ama dhismahooda la wado, oo ay ku jiraan:

- Casriyeynta Dugsiyada Sare ee Roosevelt, Franklin, iyo Grant; Dib-udhiska Faubion PK-8; Maamulidda qorshaynta iyo shaqada naqshadda ee lagu casriyeynayo Dugsiya Sare ee Farsamada ee Benson; iyo
- Casriyeynta Dugsiga Sare ee Madison Dugsiga Sare ee Lincoln iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg na waa mashaariic imika ahaan gacanta lagu hayo.

Taas waxa dheer, labadii lacagood ee damaanadda ahaa ee hore waxa ay ka maalgaliyeen mashaariic dugsi walba ah degmada oo dhan ah kuwaas oo la dhamaystiray ama uu socdo dhismahoodu, oo ay ku jiraan mashaariic kuwaas oo:

- Beddelay qasabadaha iyo qalabka laga saari karo si looga saaro macdanta loo yaqaano “lead” biyaha cabbitaanka;
- Ka saaray ama daboolay asbestos ka iyo rinjiga ka samaysan macdanta lead ee aan daboolnayn marka hore;
- Casriyeeyey nidaamyada digniinta dabka iyo rushaynta;
- Dayactiray ama ku beddelay saqafyada xumaaday ee dhaawacmay ama liigaya, saqafyo la xoojiyey oo dhulgariirka loogu talagalay;
- Dhismayaal loo habeeyey dhulgariirka si xarumaha loogu xoojiyo dhulgariirada;
- Ka saaray meesha dayrarkii si ay awood ugu yeeshaan soo gelitaanka dadka naafada ahi;
- Khafiifisay u baylshanaanta radon;
- Xoojiyey ammaankii iyo badbaadadii dugsiya; oo
- Cusboonaysiiyey shaybaadhada sayniska ee dugsiyada dhexe

IIMAYL: 2020BOND@PPS.NET • WEB: WWW.PPS.NET/2020BOND

